

Waxaa ka go'an inay caawiso macaamiisha baahida qaba iyo kuwa hoyga siiya si ay u kaydsadaan lacagta iyo tamartaba



Barnaamijka Homeowner Efficiency Redo Opportunity

Barnaamijkaanu wuxuu mulkiileyaasha guryaha ee u qalma siinaya dib u eegista tamarta oo bilaash ah si ay go'aan uga gaaraan adeegyada cimilada ee suurtagalka ah, sida qalabka kulaylka nuuga ee hoolka iyo gidaarada, dayactirka ama badelista kurshiinka/kariyaha ku shaqeeya gaaska dabiiciga ah iyo/ama biyo kululeeyaha iyo awdista hawada baxaysa iyo waxyaabo kale. Tafaftire dhanka tamarta ah oo xirfad u leh ayaa mulkiilaha guriga kala shaqeyn doona doorashada tallaabooyinka meelmarinta iyo hubinta rakibaadda saxda ah iyo shaqada cabirada ama qalabka ku filnaanshaha tamarta ee la rakibay.

Guryaha u qalmaya waa kuwo loogu talagalay halka qoys ee uu qoysku ka degen yahay aagga ay CenterPoint ku shaqayso kuwaas oo dakhligoodu yahay [80 boqolkiiba celceliska dakhliga aagaas](#) ama qoysaska tirada yar.



Haddii aad tahay mulkiilaha guriga, kirayste, mulkiilaha dhismaha ama urur ka shaqeeya guryaha qiimaha jaban, CenterPoint Energy waxay ku siinaysaa barnaamijyo kala duwan oo loogu talagalay kaydsashada lacagta iy tamarta oo ku xiran u qalmitaanka dakhliga si ay kaaga caawiso kordhinta ku filnaanshaha tamarta.

Home Energy Squad

Ogoow kaydsiga tamarta gurigaaga ee kaa qarsoon adiga soo booqanaya Home Energy Squad. Khubaradeena ayaa gurigaaga u diyaarin doonta qorshe tamar ah oo kuu gaar ah waxayna kuu rakibi doonaan qalabka tamarta kaydiya si bilaash ah kaasoo uu kamid noqon karo qalabka heerkulka lagula socdo ee la borogaraamiyo, qasabada qabayska oo tartiib u soconaysa iyo shabaqa qasabadaha suuliga qabayska ama kijada oo loo diyaariyay yareynta isticmaalka tamarta ee gurigaaga.

Booqo [HomeEnergySquad.net](#) ama wac 651-328-6220 Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo, si aad booqashada u qabsato.

La qabsiga cimilada

Mulkiileyaasha guryaha ee u qalma iyo kiraysteyaashu waxay heli karaan dib u eegista tamarta oo bilaash ah. Dib u eegistaanu waxay keenaysaa talaabooyin lagu hormarinayo ku filnaanshaha tamarta guriga, ogolaanshaha kaddibna, waxaa laguugu rakibayaa si bilaash ah oo aan wax kharash ah ugu fadhin macmiilka. Waxaa kamid noqon kara walow aysan ku ekayn kulayl nuugeyaasha hoolka iyo gidaarka lagu xiro, awdista hawada baxaysa, iyo dayactirka ama badalista kurshiinka (ama kariyaha) gaaska dabiiciga ah iyo biyo kululeeyaha.

Si ay ugu qalmaan macaamiishu waa inay ka qaybqaataan barnaamijka [Waxda Minnesota ee Barnaamijka Kaalmada Tamarta Ganacsiga](#).

Wac shaqo-wadaageena barnaamijka Sustainable Resources Center si aad u hesho macluumaad dheeraad ah 612-870-4255, Isniinta-Jimcaha, 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo, si aad u bilowdo.

Shidista nidaamka kulaylka

Macaamiisha dakhli ahaan ugu qalma waxay xaq u yeelanayaan inay helaan nidaam kululayn oo bilaash ah iyo hubinta badqabka labadii sanno ee kastaba. Adeega waxaa la bixinayaa ayadoo lala kaashanayo Wakaaladaha Community Action Partnership (CAP) ee maxaliga ah waxaana qabanaya farsamo-yaqaan ka tirsan CenterPoint Energy Home Service Plus. Macaamiisha u qalma waxaa loo dooranayaa qaab ku nasiibsi ah ayada oo lagu salaynaayo u qalmitaanka. Ballamuhu waa ay kooban yihiin.

Macaamiisha u qalanta waxaa la soo xiriiri doonta CenterPoint Energy si loogu qabto ballan sida caadiga waxay u dhexaysaa Febraayo iyo Abriil sannad walba.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo barnaamijyadaan ku saabsan, booqo [CenterPointEnergy.com/IncomeQualified](#).

Yaa iska diiwaangalin kara barnaamijkaan?			Nooca dhismaha		Adeegga uu bixiyo			Qiimaha
Barnaamijka		U qalmitaanka	Dhismeyaasha ka kooban 1-4 guri	Dhismeyaasha leh guryaha loogu tala galay qoysaska badan 5+	Dib u eegista tamarta	Rakibaadda tooska ah	Rakibaadda, badalista iyo/ama hubinta	Lacag celinta / kharash yar / bilaash ah
Mulkiileyaasha iyo kiraysteyaasha guryaha ee iska bixiya biilasha gaaska	MARDHOW SOO SOCDA: Barnaamijka Mulkiilayaasha U Qalma Ku helaan Tamarta Bilaashka ah (Homeowner Efficiency Redo Operation, HERO)	Mulkiileyaasha guryaha ee dakhligoodu yahay ama ka hooseeyo 80% celceliska qoyska tirada yar.* Caddaynta u qalmitaanka ayaa loo baahan yahay.	✓**		✓	✓	✓	Kharash yar
	Home Energy Squad Dakhli ahaan u qalma	Mulkiileyaasha guryaha/kiraysteyaasha dakhligoodu yahay ama ka hooseeyo 80% ee qoyska tirada yar ah.* Is caddayn ayaa ku xiran u qalmitaanka.	✓		✓	✓		Bilaash ah/kharash yar
	Barnaamijka Bixiya Adeegyada Cimilada ee Bilaashka ah (Income-Qualified Weatherization)	Mulkiileyaasha guryaha/kiraysteyaasha hadda qaata kaalmada tamarta buuxiyana shuruudaha kale ee barnaamijka. Caddaynta u qalmitaanka ayaa laga rabaa.	✓		✓		✓	Bilaash ah
	Income-Qualified Heating System Tune-up (Ammaan ahow, Diiranow)	Mulkiileyaasha guryaha/kiraysteyaasha hadda qaata kaalmada tamarta, ee buuxiya shuruudaha kale ee barnaamijka. Ballamo kooban ayaa u diyaar ah macaamiisha sida ku nasiibsiga ah loo xusho inta lagu jiro bilaha barnaamijka ee Febraayo - Abriil.	✓				✓	Bilaash ah
Mulkiilaha dhismaha	Income-Qualified Rental Efficiency	Mulkiileyaasha dhismeyaasha 1-4 guri leh ee >50% guryaha ay degenyihiin kiraysteyaal dakhli ahaan u qalma.* Caddaynta u qalmitaanka ayaa loo baahan yahay.	✓		✓		✓	Kharash yar
	Barnaamijka Kor u qaada Tamarta Guriga-Tamarta Guriga Qoyska (Income-Qualified Multi-Family Building Efficiency)	Mulkiileyaasha dhismeyaasha 5+ guri leh ee >66% guryaha ay degenyihiin kiraysteyaal dakhli ahaan u qalma.* Caddaynta u qalmitaanka ayaa loo baahan yahay.		✓	✓	✓	✓	Lacag celinta
Urur ka shaqeeya guryaha qiimaha jaban	Lacag celinta Guryaha qiimaha jaban ee Aan faa'iido doonka ahayn	Hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn ee siiya fursadaha mulkiilenimada/kiraysiga qiimaha jaban macaamiisha dakhligoodu hooseeyo.	✓					Lacag celinta

* U qalmitaanka ku salaysan deegaanka iyo/ama waxaa lagu xiri karaa dheefaha sarsare.

** Mulkiileyaasha guryaha oo kaliya

Multi-Family Building Efficiency ee loogu tala galay dhismeyaasha leh shanta guri iyo wixii kasii badan

Ayada oo la bixinayo ayadoo lala kaashanayo Xcel Energy, barnaamijkaanu wuxuu ku siinayaa “dukaan hal meel ah” si uu mulkiilwyaasha leh dhismeyaasha loogu talagalay qoysaska badan uga caawiyo gaarista kaydsiga ku filnaanshaha tamarta korontada iyo gaaska dabiiciga ah ee dhismaha oo dhan.

Barnaamijka waxaa kujira:

- Dib u eegista tamarta oo isla goobta lagu samaynayo oo bilaash ah
- Rakibaadda qalabka tamarta kaydiya oo bilaash ah, sida LEDs iyo madaxyada qasabadaha, ee dhammaanba meelaha dadku wada isticmaalaan iyo guryaha la degenyahay
- Ilaa 3x oo ah abaalgud dhiirigalin ah oo lacag celin ah ayaa la qaadanaya taasoo gaaraysa qiimaha qalabka dhismeyaasha dakhli ahaanta ugu qalma

Wax badan ka ogow [MultiFamilyEnergySolutions.com](https://www.CenterPointEnergy.com).

Ku filnaanshaha kirada ee dhismeyaasha leh hal ilaa afar guri

Barnaamijkaanu wuxuu mulkiileyaasha guryaha siiyaa horumarinta kaydsashada tamarta taasoo yaraynaysa isticmaalka tamarta iyo kharashaadka kiraysteyaasha u qalma ee degen dhismeyaasha halka-afarta guri ah. Si ay ugu qalmaan, ugu yaraan kala bar dadka guriga degen waa inay ahaadaan kiraysteyaal dakhli ahaan u qalma. Marka laga tago dib u eegista tamarta ee bilaashka ah, barnaamijkaanu wuxuu bixiyaa ugu yaraan 50% kharashaadka u qalmitaanka qalabka la rakibay ee la qabsiga cimilada iyo tamarta faraha badan oo ay kamidka yihiin:

- Hoolasha iyo darbiyada kulaylka nuuga
- Dayactirka ama badelista kurshiinka/kariyaha gaaka dabiiciga ah iyo/ama biyo kululeeyaha
- Awdista hawada baxaysa iyo waxyaabo kale

Wax badan ka ogow [MNPPropertyOwnerEfficiency.com](https://www.CenterPointEnergy.com).

Guriyaynta qiimaha jaban ee aan faa'iido doonka ahayn ee leh guryaha hal ilaa afar dhawaan la dhisay iyo dhismeyaasha gadaal looga daray

Barnaamijkaanu wuxuu bixiyaa abaalgud dhiirigalin ah oo loogu tala galay cabirada ku filnaanshaha tamarta ee lagu rakibo mashaariicda guriyaynta ee dhismeyaasha halka-afarta guri ah ee dhawaantaan la dhisay iyo kuwa dib looga daray ee dakhliga hooseeya asaga oo la kaashanaya ururada ka shaqeeya guryaha qiimaha jaban.

Lacag celinta waxaa lagu bixiyaa u qalmitaanka rakibaadda iyo awdista hawada, kulaylka gaaska dabiiciga ah ee faraha badan u baahan iyo qalabka kululaynta biyaha iyo talaabooyinka kale.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

La xiriir Ryan.Setterholm@CenterPointEnergy.com